HUMAN RIGHTS WATCH

# Dilal iyo Dad La Waayay

## Tacaddiyada Hawlgalka Argagixiso La Dagaallanka ee Nairobi iyo Waqooyi Bari Kenya

# Soo koobid guud

> Halkan ma jirto cid booliska ku wargalisa waxa dhaca, sababtoo ah dadka naftooda ayay u baqaan…. Waxaa jiro dad la la' yahay muddo ka badan sagaal bilood. Dad baa la haystay dhowr todobaad ama maalmo, suu'aalo la weydiiyay, ka dibna la soo daayay. Marka waa xaalad dhibaato ku ah dhammaan dadka Wajeer. Dadku waa ay baqayaan, waxayna is weydiinayaan, yuu noqon doonaa qofka xigga ee la wadan doono..
>
> **-Waxaa sidaa yiri qof ka mid ah dadka ku nool Wajeer, 22-kii Oktoobar, 2015**

29-kii bishii Juun, 2015, saddex nin ayaa tagay guriga uu magaalada Wajeer ee waqooyi bari Kenya ka degan yahay Faarax Ibraahim Qoriyow, macallin 45 jir Soomaali-Kenyan ah oo waxbarashada Islaamiga ah dhiga. Markii ay guriga ka waayeen, ayaa waxa ay ugu hanjabeen xaaskiisa iyo shan carruur ah oo uu dhalay in ay xirayaan, waa haddii ay sheegi waayaan halka uu jiro. Raggaasi ma aanay xirnayn labis loogu aqoonsan karay in ay boolis yihiin, mana aanay sheegin heybtooda, ama sababta ay u doonayeen Faarax. Ka dib waxa ay qabteen nin dukaan ku haysta meel u dhow guriga, iyaga oo ku qalday in uu yahay Faarax, balse waxa ay ku tureen meel fog, markii ay ogaadeen in aanu ahayn ninkii ay doonayeen. Raggaasi ayaa markii dambe gudoomiyaha xaafadda ku amray in uu u keeno Faarax.

Markii uu Faarax ogaaday in ay raadinayaan rag aan la aqoon, waxa uu arrinka ku wargaliyay saldhigga booliska ee magaalada Wajeer. Markii ay qoyskiisa waydiiyeen taliyaha booliska ee deegaanka Wajeer halka la geeyay Faarax, wuxuu u sheegay in aanu hayn macluumaad rasmi ah oo ku aaddan xarigiisa, isaga oo arrintaa sabab uga dhigay in ay askar badan oo ka kala socota qeybaha kala duwan ee ammaanka ay ku sugan yihiin Wajeer, intooda badana aanay ka amar qaadan, gaar ahaan booliska argagixiso la dagaallanka ee ATPU loo yaqaano, sirdoonka milateriga iyo weliba booliska maamulka.

Faarax ayaa maalintii xigtay ka ogolaaday gudoomiyaha xaafaddiisa inuu kula kulmo saldhigga booliska ee magaalada Wajeer. Daqiiqado yar ka dib markii uu gudoomiyaha saldhigga gaaray, ayaa waxaa yimid saddexdii nin oo gaari wata, sida ay sheegeen dad goob-joog ahaa. Askari boolis ah oo labisan, ayaa u sheegay qaar ka mid ah ehelada

Faarax, in saddexda nin ay ka tirsan yihiin sirdoonka milateriga Kenya. Ka dib ehelka Faarax ayaa u baxay in ay salad kusoo tukadaan dibedda saldhigga, waxaana ay soo laabteen iyadoo Faarax lala tegay, markaas ayaana aragtidiisa ugu dambeysay.

Askartii booliska ahaa ee saldhigga joogay ayaa u sheegay ehelka, in saddexdii nin ay Faarax u wateen xafiisyo ay meel aan halkaasi ka fogeyn ku leeyihiin booliska argagixiso la dagaallanka ee ATPU. Balse askarta ATPU ayaa beenisay in ay arkeen Faarax, waxaana ay ehelkiisa kula taliyeen in ay ka fiiriyaan saldhigga milateriga ee Wajeer.

Qoyska Faarax ayaa baadi goobayay muddo sanad ka badan. Wuxuu ka mid yahay ugu yaraan 34 qof oo ay ku jiraan laba haween ah, kuwaasoo sida lagu sheegay baaritaanka ay samaysay Human Rights Watch ay qabteen laamaha ammaanka, hawlgalkii argagixiso la dagaallanka waqooyi bari Kenya ee socday intii u dhexeysay sanadihii 2013 ilaa 2015, isla markaana aan la ogeyn halka ay jaan iyo cirib dhigeen.

Ehelada dadka la la' yahay ayaa si aad ah u baadi goobay, waxaana ay ka raadiyeen goobaha dadka lagu hayo, iyaga oo garab ka codsaday siyaasiyiinta iyo culimada diinta, mararka qaarna u dacwooday hay'adda Qaran ee Xuquuqul Insaanka Kenya oo dawladu maal galiso, halka qaarna ay baraha bulshada maciin bideen si ay u helaan dadka ka maqan.Mas'uuliyiinta Kenya ayaa beeniyay in ay ogyihiin halka ay jiraan dadkaasi la waayay, waxaana ay ku guuldareysateen in ay qiraan jiritaanka caddeymo muujinaya tacaddiyada dhaca xilliyada hawlgalka argagixiso la dagaallanka, ama in ay baaraan eedeymaha arrintaasi la xiriira, waxaana mararka qaar loo hanjabaa ama la waxyeeleeyaa dadka doonaya in ay helaan macluumaad ama in la isla xisaabtamo.

Human Rights Watch waxa ay rumeysan tahay in 34ta qof ay yihiin dhibanayaal qasab lagu kaxaystay, oo sharciga caalamiga ah uu u aqoonsan yahay dad xoriyadooda ay ka qaateen laamaha dowladda, isla markaana la inkiray xarigooda ama la qariyay xaalkooda iyo halka ay ku sugan yihiin. Waxaa intaa dheer in meydadka in ka badan 11 qof oo labadii sano ee lasoo dhaafay la helay, qaarkoodna lagu arkay meel aan ahayn halkii laga qabtay, dadkaasi oo ahaa kuwo ay markii hore xireen laamaha ammaanka ee Kenya. Inta ay ogtahay Human Rights Watch, boolisku ma aanay samayn baaritaan micna leh oo ku aaddan dhimashada dadkaasi. Waxaa meydadkaasi ka mid ah mid laga helay deegaanka Mandheera Disembar 2015, oo laga soo saaray god lagu aasay ka dib markii ay hogaamiyayaasha deegaanka iyo hay'adaha aan dowliga ahayn sidaa dalbadeen,

hasayeeshee dowladda Kenya meydkaasi kuma aanay samayn baaritaan sida uu dhigayo sharciga dalka u yaalla.

Hadallada marqaatiyada ayaa muujinaya in 34-ta qof ee la la' yahay iyo 11-ka qof ee la dilay, kuwaasoo intooda badan ah Soomaali-Kenyan, ay suuragal tahay in uu ku socday baaritaan ku aaddan xiriir la sheegay in ay la leeyihiin ururka Al-Shabab ee fadhigiisu yahay dalka Soomaaliya. Ururkaasi ayaa weerarro badan oo khasaare dhaliyay sanadihii lasoo dhaafay kula beegsaday dadka rayidka ah ee Kenya, waxaana ka mid ahaa kii bishii Abriil 2015 ka dhacay Jaamacadda Gaarisa ee waqooyi bari Kenya, halkaasi oo ay ku dhinteen in ka badan 142 arday ah. Weerarrada noocaasi ah waa kuwo dembi ah oo aan qiil loo yeeli karin xilli kasta, waxkasta oo dhiirageliyaba.

Dowladaha waxaa mas'uuliyad ka saaran tahay sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, kaasoo dhigaya in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee ay dhibaatooyinka uga ilaalinayaan dadka ku hoos nool. Waxaa sidoo kale dowladaha mas'uuliyad ka saaran tahay in ay xaqiijiyaan in dhammaan tacaddiyada lagu eedeeyo laamaha ammaanka si cadaalad ah loo baaro, iyada oo la aqoonsanayo kuwa ka dambeeyay, isla markaana kuwa la tuhunsan tahay lagu maxkamadeynayo maxkamad madax bannaan. Sida uu dhigayo sharciga caalamiga ah, dhammaan la tuhunsanayaasha oo ay ka mid yihiin kuwa looga shakiyay argagixisonimada, waa in la mariyaa hannanaka cadaallada. Waajibaadkaasi waxay u baahan yihiin in la xaqiijiyo sinnaanta iyo hannaanka cadaallada marka la samaynayo baaritaannada, maxkamadaynta iyo weliba in si bani'aadannimo ku jirto loola dhaqmo dadka xiran.

Warbixinta ayaa lagu diiwaangeliyay tacaddiyo ay ku lug leeyihiin laamaha ammaanka ee la xiriira hawgalada looga hortagayay khatarta uu ururka Al-Shabab ku hayo deegaannada ku yaalla waqooyi bari Kenya, intii u dhexeysay Disembar 2013 iyo Disembar 2015.

Si khilaafsan waajibaadka Kenya ka saaran sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, hawlgalada ay sameeyeen laamaha ammaanka ayaa mararka qaar ahaa kuwo ay hareeyeen dilal, dad la waayay, jirdil iyo xarig aan loo meeldayin oo lagula kacay dadka Soomaali-Kenyanka ah.

Human Rights Watch ayaa warbixintan ku waraysatay 117 qof, oo qaarkood ay bishii Sebtembar 2015 kula kulantay deegaanka Gaarisa, qaarna bishii Oktobar 2015 ay ku

waraysatay deegaanka Wajeer, kuwana bishii Disembar 2015 ay kula kulantay deegaanka Mandheera, halka inta kalana ay bilihii Luuliyo, Nofembar 2015 iyo Janaayo 2016 ku waraysatay Nairobi. Human Rights Watch ayaa sidoo kale la hadashay dhibanayaasha xariga aan loo meeldayin, xabsiga sharci darrada ah iyo kuwa sida xun loola dhaqmay, dad goob-joog u ahaa xariga iyo goobaha ay laamaha ammaanka u dhaceen, saraakiil ka tirsan kuwa ammaanka oo ka tirsan Ciidanka Difaaca Kenya iyo booliska aqoonta gaarka ah u leh hawgaladaas, hogaamiyayaasha siyaasadda ee heer deegaan iyo heer qaranba, difaacayaasha xuquuqda aadanaha, culimo iyo weriyayaal.

Warbixintan ayaa lagu diiwaangeliyay qaabka ay askar ka tirsan laamaha kala duwan ee ammaanka ay ugu dhaceen guryo, xarumo ganacsi iyo weliba iskuulo, si ay u qabtaan shakhsiyaad ama ay baaritaan u sameeyaan, hawlgaladaasi oo mararka qaar dhacay habeen barkii. Qaar ka mid ah dadka hawlgaladaasi lagu qabtay ayaan dib loo arag. Saraakiisha ammaanka ee fuliyay hawlgalada ama baaritaannada lagu diiwaangeliyay warbixintan ayaan inta badan xirneyn labis gaar ah, mana aanay sheegin heybtooda, waxaana taasi ay caqabad ku noqotay ehelada dadka la watay ee doonaya in ay cadaallad helaan. Xilliyada qaarna, saraakiisha ammaanka ee hawlgalada samaynayay ayaa wajiga xirnaa, waxaana inta badan ay muddo dheer indhaha u xirayeen dadka ay qabtaan, taasoo caqabad kale ku ah sidii loo aqoonsan lahaa unugyada ay ka tirsan yihiin askartaasi ama shakhsiyadooda.

Ehelada iyo asxaabta dhibanayaasha ayaa rumeysan in dadka ka dambeeya hawlgaladaasi ay yihiin xooggaga ammaanka ee Kenya, sababtoo ah waxaa jiray marar aan badneyn oo ay xirnaayeen labiska booliska ama milateriga Kenya, halka mararka kale ee aanay labiskaasi xirnayn, ay wateen kaararka aqoonsiga ee booliska ama milateriga, ayna ku socdeen gawaari ay ku dhegan tahay astaanta rasmiga ah ee dowladda. Human Rights Watch ayaa diiwaangelisay in mararka qaar la arkay askarta dadka qabatay oo dadka ay wataan gawaari ku gelinaya saldhigyada booliska ama kuwa milateriga. Dadka lagu beegsado hawlgaladaasi ayaa u badan ragga ay da'dooda u dhexeyso 20 ilaa 40 jirka, qaar badan oo ka mid ahna ay yihiin Imaamyo ama macallimiinta waxbarashada Islaamiga ah (ee loo yaqaano macallin dugsiga) iyo ardaydooda ama dadka mas'uulka ka ah masaajidda maxaliga ah.

Dhammaan kiisaska lagu diiwaangeliyay warbixintan, qoysaska dadka la xiray iyo dadkii goob-jooga u ahaa hawlgalada, ayaa sheegay in saraakiisha ammaanka aanay soo

bandhigin warqadda baaritaanka ama xiritaanka. Inkastoo Xeerka Hannaanka Dembiyada Kenya uu dhigayo in dadka warqad la'aanta la xiray ay tahay in ay booliska maxkamad hor geeyaan muddo 24 saac gudahood ah, haddana saraakiisha ammaanka ayaa si joogta ah ugu guuldaraystay in ay la tuhunsanayaasha maxkamad ku geeyaan waqti cayiman, gaar ahaan xilligan ay socdaanhawlgalada ay laamaha ammaanka ka wadaan waqooyi bari Kenya.

Ehelada dadka la la' yahay ayaa si weyn u raadiyay macluumaad ku aaddan halka dadka la qabtay ay jiraan. Qaar ka mid ah eheladaasi ayaa gudbiyay codsi ay maxkamadaha dalka uga dalbanayaan in ay dowladda ku amraan bixinta xogta dadka la la' yahay. Hasayeeshee markasta mas'uuliyiinta ayaa beeniyay in ay ogyihiin halka ay jiraan dadkaasi la waayay.

Intii uu socday baaritaankan, Human Rights Watch, ayaa warqado u dirtay booliska, milateriga, waaxda duurjoogta Kenya, iyo weliba wasiiradda mas'uulka ka ah hay'adahaasi, iyadoo su'aallo ka weydiineysa halka iyo xaalka ay ku sugan yihiin dadka la watay. Warqadahaasi ayaa lagu xusay xilliga iyo goobta laga qabtay qof kasta oo ka mid ah dadkaasi la la' yahay iyo goorta ugu dambeysay ee la arko. Waaxda duurjoogta ayaa soo jawaabtay, waxaana ay beenisay in ay wax war ah ka hayso xariga dadkaasi. Ma jiro mas'uul kale oo dowladda ka tirsan oo ka jawaabay su'aallaha aan weydiinay.

Baaritaanno hore oo ay afartii sano ee lasoo dhaafay sameeyeen Human Rights Watch iyo hay'adaha aan dowliga ahayn ee u dooda xuquuqda aadanaha Kenya, ayaa lagu sheegay in booliska argagixiso la dagaallanka ee ATPU iyo kuwa rabshadaha ka hortaga ee loo yaqaano GSU, ay ku lug leeyihiin dilal iyo dad la waayay oo ka dhacay Nairobi iyo gobolka xeebta ee Kenya. Tan iyo markii ay sare u kaceen weerarrada Al-Shabab ee gobolka waqooyi bari Kenya dhammaadkii sanadkii 2014, ayaa askar ka socota laamaha kala duwan ee ammaanka sida Ciidanka Difaaca Kenya, Booliska, Sirdoonka Qaranka, iyo Kuwa Ilaalada Duurjoogta waxaa la geeyay gobolka. Weriyayaasha iyo siyaasiyiinta deegaanka ayaa soo jeediyay eedeymo badan oo ku aaddan dad la waayay, kuwo la dilay, xarig aan loo meeldayin, meydad aan la aqoonsan oo laga helay godad aan si fog loo qodin, sida ay sheegeen warbaahinta iyo dad goob-joog ahaa.

Dowladda Kenya waa in ay si degdeg ah wax uga qabataa eedeymaha ku aaddan tacaddiyada lala xiriirinayo hawlgalada argagixiso la dagaallanka, ayna bixisaa macluumaadka, heybta iyo halka ay ku sugan yihiin dadka lagu qabtay hawlgaladaasi, isla

markaana ay xaqiijisaa in hannaanka cadaallada asaasiga ah la mariyay dhammaan dadka la qabtay ama hadda xiran.

Kenya waa in ay ku shaqeysaa dastuurkeeda ayna fulisaa waajibaadka ka saaran sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Dowladdu waa in ay xaqiijisaa in sharciga la raaco inta ay socdaan dhammaan hawlgalada, iyo in askarta milateriga iyo kuwa ilaalinta duurjoogta aanay ka qeyb qaadan qabqabashada dadka, maadaama aanay sharciyad u lahayn arrinkaasi. Dowladdu waa in sidoo kale ay xaqiijisaa in dhammaan dadka ay booliska qabtaan si wanaagsan loogu qoro diiwaanka, isla markaana lagu xiro saldhigyada booliska, oo aan lagu xirin xeryaha milateriga ama duurarka, sida mararka qaar dhacday.

Madaxweyne Uhuru Kenyatta waa inuu si shaac baxsan u qiraa xajmiga ay leeyihiin eedeymaha badan ee lasoo jeediyay, isla markaana uu cambaareeyaa tacaddiyada noocaasi ah ee ay ku kacaan xooggaga ammaanka. Waa inuu ku amraa xooggaga ammaanka in ay raacaan sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, ay soo afjaraan dadka inta ay wataan haddana la waynayo, kuwa sharci darrada lagu dilayo, kuwa jirdilka loo geysto, isla markaana uu ku amraa laamaha ammaanka iyo dacwad oogayaasha in ay tallaabooyinka loo baahan yahay qaadaan si kuwa falalkaasi mas’uulka ka ah loola xisaabtamo. Waxaa intaa dheer in madaxweynaha looga baahan yahay in uu alkumo gudi gaar ah oo madax bannaan, ayna ku jiraan hay’ado kala duwan, kaasoo baaritaan ku sameeya inta ay gaarsiisan yihiin tacaddiyada ka dhasha hawlagalada argagixiso la dagaallanka ee Kenya.

Inkastoo ay jiraan warbixinno badan oo ku aaddan tacaddiyada ayna dhowrkii sano ee lasoo dhaafay diyaariyeen hay’ado kala duwan, ayaa Kenya weli waxa ay tahay dal dowr muhiim ah ka qaata dadaallada lagula dagaallamyo argagixisada Bariga Afrika, waxaana ay kaalmo deeq ah ka heshaa Maraykanka, UK, Midowga Yurub iyo ururo kale. Human Rights Watch ayaa ugu baaqaysa hawl-wadaagayaasha caalamiga ah ee Kenya in ay si shaac baxsan u cambaareeyaan tacaddiyadan, ayna ku baaqaan baaritaanno iyo isla xisaabtan, iyo in ay xaqiijiyaan in taageero kasta oo ay siiyaan laamaha ammaanka ee Kenya, gaar ahaan tababarka, tasiilaadka iyo kaalmada muuqata aanay gaarin unugyada ama taliyayaasha lagu eedeeyay dadka la la’ yahay, dilalka sharci darrada ah ama jirdilka. Deeq-bixiyayaasha waa in ay si joogta ah ugu cadaadiyaan Kenya in ay baaritaanno micno

leh samayso, oo la maxkamadeeyo kuwa dembiyadaasi galay, isla markaana ay dowladda gacan ka siiyaan baaritaannada u baahan farsamada sareysa.

# Talooyin muhiim ah

## Ku aaddan Madaxweynaha Kenya

- Waa inuu ku amraa xooggaga ammaanka in ay soo afjaraan dadka inta ay wataan haddana la waynayo, kuwa jirdilka loo geysto, kuwa sharci darrada lagu dilayo, iyo xariga aan loo meeldayin ee dadka la tuhmo.Waa in uu ku amraa saraakiisha ay khuseyso iyo dacwad oogayaasha in ay tallaabooyinka loo baahan yahay qaadaan si loo baaro eedeymaha tacaddiyada, kuwa dembiyadaasi mas'uulka ka ahna loola xisaabtamo.
- Waa in uu si degdeg ah u alkumaa gudi gaar ah oo madax bannaan, ayna ku jiraan hay'ado kala duwan, kaasoo baaritaan ku sameeya isla markaana si joogta ah uga warrama kiisaska taagan ee dadka la waayay, kuwa sida sharci darrada ah loo dilay iyo jirdilka ka dhaca waqooyi bari Kenya iyo qeybaha kale ee dalka.
- In uu u magacaabo qof sumcad wanaagsan leh, isla markaana ay ka go'antahay ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo sharciga xiriirinta macluumaadka ay doonayaan ehelada raadinaya dadka ay la' yihiin.

## Ku aaddan xooggaga ammaanka

- Waa in ay si degdeg u bixiyaan macluumaadka halka ay jiraan dadka la waayay, ayna degdeg dacwado ugu soo oogaan dadka lagu hayo cadeymaha muuqda, hannaanka dacwadahaasina ay noqdaan kuwo waafaqsan heerka caalamiga ah, iyada oo la sii deynayo dhammaan kuwa kale, isla markaana magdhow la siinayo dadka sida sharci darrada ah loo xiray.
- Waa in ay xaqiijiyaan in qof kasta oo lagu xiro Kenya, ayna ku jiraan kuwa looga shakiyay in ay xiriir la leeyihiin Al-Shabab, loo xiro qaab waafaqsan sharciga dalka u yaalla, ayna ka mid tahay in lagu hayo meelo rasmi ah oo la ogyahay, si degdeg ah loo horkeeno maxkamad, isla markaana ay la kulmaam qareennada difaacaya iyo xubnaha qoysaskooda.

## Ku aaddan baarlamaanka Kenya

- In ay dood ka yeeshaan tacaddiyada ay xooggaga ammaanka ka geystaan gobolka waqooyi bari iyo qeybaha kale ee dalka, taasoo ujeedkeedu yahay in ay sameeyaan mooshin ay dowladda ku cadaadinayaan alkumida gudi madax bannaan, dhexdhexaad ah, oo hay'ado kala duwan ka kooban, kaasoo baara tacaddiyada.
- In ay sameeyaan gudi heer baarlamaan ah oo baaritaan ku sameeya tacaddiyada ka dhaca waqooyi bari, kaasoo xoojinaya baaritaannada uu sameeyo gudiga madaxa bannaan ee ay dowladdu alkuntay, ama bedel u noqonaya waa haddii ay dowladdu samayn waydo baaritaanno wax ku ool ah.

## Ku aaddan Maraykanka, UK iyo Midowga Yurub

- In ay si shaac baxsan u cambaareeyaan tacaddiyada xuquuqda aadanaha ee ka dhaca Kenya, marka ay soo baxaan macluumaadka ku saabsan, ayna hoosta ka xariiqaan muhiimadda ay leedahay ilaalinta xuquuqda aadanaha, iyaga oo arintaa shardi uga dhigaya la shaqaynta xooggaga ammaanka ee Kenya.

In ay xaqiijiyaan in taageero kasta oo ay siiyaan laamaha ammaanka ee Kenya, gaar ahaan tababarka, tasiilaadka iyo kaalmada kale ee muuqata aanay gaarin unugyada ama taliyayaasha lagu eedeeyay dadka la la' yahay, dilalka sharci darrada ah ama jirdilka.

# Talooyin dheeraad ah

## Ku aaddanXafiiska Madaxweynaha iyo Xukuumadda Dalka

Difaacidda Xuquuqda Dadka La Qabtay iyo Dhammaan Dadka Kale ee Xiran

- Waa in ay si shaac baxsan u qiraan xajmiga ay leeyihiin tacaddiyada Kenya ka dhaca xilliyada ay socdaan hawlgalada argagixiso la dagaallanka, ayna cambaareeyaan la xisaabtan la'aanta tacaddiyada noocaasi ah.
- Waa in ay ku amraan xooggaga ammaanka in ay soo afjaraan jirdilka, dadka la waayo, kuwa sharci darrada lagu dilo, iyo xariga aan loo meeldayin. Waa in ay booliska, milateriga iyo waaxda duurjoogta ku amraan in ay xaqiijiyaan in dacwad oogayaasha ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka loo baahan yahay, si ay u baaraan eedeymaha tacaddiyada ayna sharciga u mariyaan kuwa mas'uulka ka ah.
- Waa in ay xaqiijiyaan in dadka la xiro, oo ay ka midka yihiin kuwa looga shakiyo in ay xiriir la leeyihiin Al-Shabab, lagu hayo meelo la aqoonsan yahay, isla markaana la siiyo dhammaan xuquuqda ay leeyihiin maxaabiista, sida in aan wax jirdil ah loo geysan ama aan si xun loola dhaqmin, iyo in ay la kulmaam qareennada difaacaya iyo xubnaha qoysaskooda.
- Waa in ay xaqiijiyaan in dhammaan dadka la qabtay, isla markaana si macquul ah looga shakiyay in ay dembi galeen, si wanaagsan loo maxkamadeeyo, iyaga oo degdeg loo horkeenayo cadaallada, isla markaana lagu qaadayo hannaan sharci oo shaac baxsan, cadaalad ah, kaasoo ka dhacaya maxkamad dhexdhexaad ah, madax bannaan oo shaqadeeduna hufan tahay.
- Waa in ay amraan in dhammaan dadka xabsiyada lagu hayay wax ka badan mudada uu sharciga ogol yahay ee 24-ka saac ah, isla markaana aanay jirin xukun maxkamadeed oo amraya sii hayntooda, in si degdeg ah loo daayo, ama la horkeeno maxkamad sharci ah. In ay xaqiijiyaan in qof kasta oo ay cadaato in si sharci darro ah loo hayay uu helo magdhow.

- Waa in ay ku amraan dhammaan askarta ka qeyb qaadanaysa hawlgalada ammaanka in ay heybtooda sheegaan xilliyada ay hawlgalka wadaan sida uu sharciga qabo, ama ay xirtaan labis lagu aqoonsan karo xilli kasta.
- Waa in ay saxiixaan Xeerka Caalamiga Ah ee Dadka oo Dhan ka Difaacaya In Si Qasab ah Lagu Wato, Ka dibna La Waayo (ICCPED)

## Isla Xisaabtanka Ku aaddan Hawlgalada ay Tacaddiyada Ka Dhashaan

- Waa in ay si degdeg ah u alkumaan gudi gaar ah oo madax bannaan, ayna ku jiraan hay'ado kala duwan, kaasoo baaritaan ku sameeya isla markaana si joogta ah uga warrama kiisaska taagan ee dadka la waayay, kuwa sida sharci darrada ah loo dilay iyo jirdilka ka dhaca waqooyi bari Kenya iyo qeybaha kale ee dalka. Gudiga waa in uu sharciyad u lahaadaa amridda taliye kaste, ama askari kaste oo ka tirsan hay'adaha dowliga ah, oo uu ku jiro milateriga.
- Waa in ay xaqiijiyaan in amradda gudiga la xushmeeyo, la raaco, isla markaana talooyinkiisa si degdeg ah loo meel mariyo.
- Waa in gudigu uu haddii loo baahdo sharciyad u leeyahay ogaanshaha masiirka iyo halka ay ku sugan yihiin dadka la la' yahay, geeri ama noolal, uuna macluumaadkaasi la wadaagaa qoysaska ay dadka ka maqan yihiin, isla markaana uu ku taliyaa cidda ay tahay in loo maxkamadeeyo. Gudigu waa in uu lahaadaa dhaqaale ku filan, iyo khibrad uu ku baari karo kiisaska gaarka ah, waana in sida ugu ballaaran ee macquulka ah loo shaaciyaa waxa uu gudiga ku ogaado baaritaannadiisa, iyada oo warbixinnadiisa lagu wareejinayo hay'ad garsoor oo sumcad leh, si loo sii wado suuragalnimada maxkamadeynta.
- Waa in ay xaqiijiyaan in si joogta ah oo wanaagsan loo baaro tacaddiyada ay geystaan booliska, iyada oo la adeegsanayo hay'adaha isla xisaabtanka sida Hay'adda Madaxa bannaan ee Dusha Kala Socota Booliska (IPOA), Gudiga Qaranka ee Adeega Booliska iyo Unugta Arrimaha Gudaha, halka Ciidanka Difaaca Qaranka iyo Waaxda Ilaalada Duurjoogtana dib u eegid lagu samayn karo hannaanka hadda lagula xisaabtamo, iyada oo ujeedku yahay in la dhiso qaab isla xisaabtan oo xooggan, si wax looga qabto tacaddiyada ay geystaan askarta milateriga iyo kuwa ilaalada duurjoogta.

- Waa in ay amraan in askarta ka tirsan waaxda duurjoogta, booliska iyo milateriga ee lagu eedeeyo in ay ka dambeeyeen dadka la waayay, kuwa sida sharci darrada ah loo dilay, xariga aan loo meeldayin iyo jirdilka ka dhacay waqooyi bari Kenya, shaqada laga joojiyo, isla markaana lagu sameeyo baaritaan qoto dheer, edbin ama maxkamadeyn. Kuwa lagu helo in ay mas'uul ka yihiin tacaddiyo ba'an, waa in laga saaraa booliska iyo milateriga, iyo weliba in la mariyaa ciqaab dheeraad ah oo uga timaadda hannaanka garsoorka dalka.
- Waa in ay amraan in askari kasta oo ka tirsan waaxda duurjoogta, booliska iyo milateriga ee lagu eedeeyo in uu ka dambeeyay dadka la waayay, kuwa sida sharci darrada ah loo dilay, xariga aan loo meeldayin iyo jirdilka ka dhacay waqooyi bari Kenya, ayna ka midka yihiin saraakiisha loo qabsan karo mas'uuliyadda taliyennimo, lagu sameeyaa baaritaan iyo maxkamadeyn ku haboon, kuwaasoo ku dhaca qaab cadaalad ah.
- Waa in ay si degdeg ah u bilaabaan hannaanka lagu laalayo shuruucda dhawaan la sameeyay ee booliska iyo milateriga siinaya awoodaha ballaaran ee ay dadka ku xiri karaan, ku hayn karaan, ku joojin karaan, isla markaana ku baari karaan, shuruucdaasi oo meel uga dhacaysa xuquuqda eedeysanayaasha, isla markaana wiiqaysa qaababka isla xisaabtanka ee ku cad dastuurka Kenya ay yeelatay sanadkii 2010.

## Taageeridda Qoysaska Dhibanayaasha iyo Ilaalinta Xuquuqdooda

- Waa in deegaan kasta oo ay saameeyeen tacaddiyada laga hirgeliyaa goob ay qoysaska ka helaan kaalmo iyo macluumaadka ay u baahan yihiin, gaar ahaan masiirka iyo halka ay ku sugan yihiin dadkooda la la' yahay, iyo haddii ay suuragal tahay in qoysaskaasi la siiyo kaalmo dhanka maskaxda ah, maadaama ay ka walaacsan yihiin dadkooda la la' yahay ama la dilay.
- Waa in ay xaqiijiyaan in qoysaska doonaya in ay helaan cadaalad ku aaddan dadkooda la dilay, la waayay ama la jirdilay, ay yihiin kuwo difaac haysta, isla markaana lagu dhiirageliyo in ay raadsadaan cadaaladda uu sharciga u ogolyahay.
- Waa in ay xaqiijiyaan in askarta ka tirsan booliska, ilaalada duurjoogta iyo milateriga ee lagu helo in qoysaska cadaaladda doonaya ay niyad

jabinayaan ama ay u hanjabayaan, lagu sameeyo baaritaan, la maxkamadeeyo ama loo ciqaabo sida ku haboon, isla markaana shaqada laga eryo.

## Uga Jawaab-celinta Weerarrada Al-Shabab Iyada oo Sharciga La Raacayo

- Waa in ay xaqiijiyaan in booliska Kenya ay ku sameeyaan weerarrada mustaqbalka baaritaanno dembi oo wax ku ool ah, si loo xaqiijiyo in kuwa mas'uulka ka ah la horkeeno cadaallada si waafaqsan sharciga.
- Waa in ay xaqiijiyaan in askarta ammaanka ee Kenya ay leeyihiin tababar ku aaddan shaqadooda kaasoo waafaqsan heerarka caalamiga ah, isla markaana ay haystaan qalab iyo dhaqaale ku filan oo ay si wanaagsan oo sharci ah uga jawaab-celin karaan khatarta ammaan ee ay wajahayso Kenya.
- Waa in ay si xooggan uga mamnuucaan Waaxda Duurjoogta Kenya, Booliska iyo Milateriga in ay ku kacaan falalka hadda baahsan ee jirdilka, dadka la waynayo iyo dilka. Taa bedelkeeda, waa in la wanaajiyaa awoodda baaritaan ee uu leeyahay booliska.

## Ku aaddan Taliyaha Guud ee Booliska, Hay'adda Madaxa bannaan ee Dusha Kala Socota Booliska (IPOA), Gudiga Qaranka ee Adeega Booliska iyo Unugga Arrimaha Gudaha

- Waa in ay xaqiijiyaan in wararka sheegaya tacaddiyada ay geystaan hay'adaha ammaanka ee hawlgalka ka wada deegaannada waqooyi bari Kenya ee Gaarisa, Wajeer iyo Mandheera si wanaagsan oo daacad ah loo baaro, ayna baaritaannadaasi ku lug yeeshaan Hay'adda Madaxa bannaan ee Dusha Kala Socota Booliska (IPOA), Gudiga Qaranka ee Adeega Booliska iyo Unugga Arrimaha Gudaha, askarta lagu helo dembiyadana lala xisaabtamo.
- Waa in ay baaraan wararka sheegaya in ay jiraan askar boolis ah oo si sharci darra ah ugu guuldareystay mas'uuliyoddooda, kuwaasoo ku sugan saldhigga booliska ee Gaarisa, kan Madogo ee ka tirsan deegaanka Gaarisa, saldhigga booliska ee Wajeer, saldhigga booliska ee Mandheera,

kan Fino ee hoostaga deegaanka Mandheera, iyo kuwo kale oo badan, askartaasi oo eryay dhibanayaal doonayay in ay dacwado gudbiyaan, una hanjabay dad marqaati ah, isla markaana ku guuldareysatay in ay baaraan dacwadaha loogu geeyay saldhigyadaasi. Waa in shaqada laga joojiyaan taliyayaasha mas'uulka ka ahaa saldhigyadaasi xilliga ay arrimahaasi dhacayeen, baaritaan lagu sameeyaa, la maxkamadeeyaa, ama haddii loo baahdo shaqada laga eryaa.

- Waa in ay diyaariyaan diiwaan dhamaystiran oo ah dhammaan askarta booliska oo ay ku jiraan gudoomiyayaasha dowladda dhexe u qaabilsan deegaannada iyo taliyayaasha booliska ee kasoo shaqeeyay gobolka waqooyi bari Kenya xilliga la tilmaamay. Diiwaankaasi waa in la siiyaa gudiga madaxa bannaan ee hay'adaha kala duwan ka kooban ee loo alkumi doono in uu baaro tacaddiyada ka dhacay gobolka waqooyi bari Kenya.
- Waa in ay saameeyaan hubin cusub oo ku aaddan askarta booliska ah ee afartii sano ee lasoo dhaafay kasoo shaqeeyay gobolka waqooyi bari Kenya, xilligaasi oo ay aad u badnaayeen tacaddiyada, waana in askartaasi ay ka mid ahaadaan kuwa ka tirsan Booliska Argagixiso La Dallaanka ee dalka oo dhan.
- Taliyaha guud ee booliska waa in uu adeegsadaa awoodiisa ku xusan qeybta 385-aad ee Xeerka Hannaanka Dembiyada, oo uu baaritaanno ku sameeyaa dhammaan kiisaska dadka sharci darrada lagu dilay ee gobolka waqooyi bari Kenya.
- Waa in ay xaqiijiyaan in sharciga la raaco marka la qaadayo dhammaan hawlgalada. In milateriga iyo waaxda duurjoogta Kenya ee aan sharciyadda u lahayn in ay dadka qabqabtaan aanay ka qeyb qaadan hawlgalada dadka lagu xirayo. In dhammaan dadka ay booliska qabtaan si sax ah loogu diiwaangeliyo buugga yaalla saldhigyada booliska, oo aan lagu xirin xeryaha milateriga ama duurarka. Waa in la maxkamadeeyaa askari kasta oo ka tirsan waaxda duurjoogta ee lagu helo in uu si sharci darro ah dad u xiray.
- Waa in ay xaqiijiyaan in marka ay booliska dadka qabqabanayaan aanay iyagu xirneyn maasgaraado wajigooda qarinaysa, ayna wataan aqoonsi iyo

labiska booliska, gawaarida ay ku socdaana ay yihiin kuwo si sax ah ay ugu dhagan tahay taariko sharci ah.

- Waa in ay xaqiijiyaan in booliska ay dadka soo xiraan iyaga oo wata warqad sharci ah oo ay jartay maxkamad dastuuri ah sida uu dhigayo sharciga Kenya, ama in dadka lasoo qabtay si dhaqso leh loo horgeeyo maxkamad isla markaana dacwad lagu soo oogo.
- Waa in ay xaqiijiyaan in booliska dadka ay soo qabtaan u sheegaan xuquuqdooda, gaar ahaan in ay xaq u leeyihiin qareen difaaca, in dadka la xiray aan lagu hayn meel gooni ah, iyo in caddeymaha lagu helo qaab sharci ah ee aan lagu raadin jirdil.

## Ku aaddan Abaanduulaha Ciidanka Difaaca Kenya

- In uu baaro wararka sheegaya in Ciidanka Difaaca Kenya uu ku lug leeyahay jirdil, dad la waayay, iyo dilal ka dhacay gobolka waqooyi bari ee uu ka socdo hawlgalka argagixiso la dagaallanka, iyo xaqiijinta in askarta ciidankaasi ka tirsan iyo taliyayaasha lagu helo in ay ka dambeeyeen tacaddiyadaasi lala xisaabtamo.
- In uu shaaca ka qaado heybta, halka ay ku sugan yihiin iyo dacwadaha lagu soo oogay qof kasta oo lagu xiray xeryaha milateriga ee ku yaalla waqooyi bari Kenya.
- In uu baaritaan ku sameeyo taliyayaasha xeryaha milateriga ee ku yaalla Gaarisa, Wajeer iyo Mandheera ee sida sharci darrada ah u amray in xeryaha gobolka waqooyi bari lagu xiro isla markaana lagu jirdilo dadka.
- In uu u diyaariyo una gudbiyo gudiga madaxa bannaan ee ay dowladdu samaysay diiwaanka dhammaan askarta milateriga Kenya iyo taliyayaasha ka shaqeeyay gobolka waqooyi bari, suuragalna ay tahay in ay ku lug lahaayeen tacaddiya, si baaritaan loogu sameeyo.
- In uu sameeyo qaab uu ku heli karo, kuna baari karo dacwadaha ay dadka rayidka ah ka qabaan askarta milateriga ee ka madaxa bannaan taliska ciidanka, sida in uu sameeyo hay'ad rayid ah oo dusha kala socota ciidanka, lana mid ah tan madaxa bannaan ee dusha eegta hawlaha booliska (IPOA).

- In uu magdhow siiyo dhibanayaasha ay dhaawacyada muuqda ama khasaaraha maal kasoo gaareen hawlgalada Ciidanka Difaaca Kenya.

## Ku aaddan Agaasimaha Dacwad Oogga Dadweynaha

- In uu u tilmaamo taliyaha guud ee booliska in uu amro baaritaan shaac baxsan oo lagu samaynayo dhammaan dilalka sharciga ka baxsan ee ka dhacay gobolka waqooyi bari Kenya xilliga la tilmaamay.
- In uu u tilmaamo Gudiga Adeega Booliska in uu baaro wararka sheegaya in tacaddiyo ay geysteen ciidanka ammaanka, kuwaasoo ka dhacay deegaannada Gaarisa, Wajeer iyo Mandheera.
- In uu maxkamadeeyo xubnaha ka tirsan ciidanka ammaanka ee ay ku cadaato in ay galeen dembiyo la xiriira tacaddiyada ka dhacay gobolka waqooyi bari Kenya, iyo weliba askarta mas'uulka ka ah xadgudubyada ka dhaca qeybaha kale ee dalka Kenya.

## Ku aaddan Baarlamaanka Kenya

- In uu si waafi ah uga hadlo tacaddiyada ay Ciidanka Difaaca Kenya iyo booliska ka geystaan gobolka waqooyi bari Kenya iyo deegaannada kale ee dalka, taasoo ujeedkeedu yahay in ay sameeyaan mooshin ay dowladda ku cadaadinayaan alkumida gudi madax bannaan, dhexdhexaad ah, oo hay'ado kala duwan ka kooban, kaasoo baara tacaddiyada.
- In uu kala shaqeeyo xafiiska xeer ilaaliyaha guud sidii loo samayn lahaa sharci si waafi ah la iskula xisaabtamayo, isla markaana si buuxda loogu adeegsan karo la tacaalidda kiisaska sii badanaya ee ah tacaddiyadda ay geystaan Ciidanka Difaaca Kenya iyo kan Ilaalinta Duurjoogta, markasta oo ay hawlgal ka sameeyaan gudaha dalka.
- In ay sameeyaan gudi heer baarlamaan ah oo baaritaan ku sameeya tacaddiyada ka dhaca waqooyi bari, kaasoo xoojinaya baaritaannada uu sameeyo gudiga madaxa bannaan ee ay dowladdu alkuntay, ama bedel u noqonaya waa haddii ay dowladdu samayn waydo baaritaanno wax ku ool ah.

## Ku aaddan Deeq-bixiyayaasha caalamiga ah ee Kenya iyo Qaramada Midoobay

- In ay si shaac baxsan iyo si hoosaba u cambaareeyaan tacaddiyadda ba'an ee ay xuquuqda aadanaha u geystaan Sirdoonka Milateriga, Waaxda Dembi Baarista, Booliska Argagixiso La Dagaallanka, Cutubka Sida Degdega ah Loo Hawlgeliyo, Cutubka Ilaaliya Xuduudaha Miyiga ee ka tirsan Ciidanka Maamulka, Hay'adda Qaran ee Sirdoonka iyo Waaxda Ilaalinta Duurjoogta.
- In ay si shaac baxsan iyo si hoosaba ugu baaqaan dowladda Kenya, in ay tallaabooyin wax ku ool ah u qaado sidii ay u baari lahayd, u xiri lahayd, una maxkamadayn lahayd kuwa mas'uulka ka ah jirdilka, dadka la la' yahay iyo dilalka sharciga ka baxsan ee ka dhaca gobolka waqooyi bari, ayna ka midka yihiin kuwa qaadaya mas'uuliyadda hogaanka. In ay si joogta ah ula socdaan hormarka ay dowladda ka samayso tallaabooyinkaasi.
- In ay xaqiijiyaan in taageerada muuqata ee ay siiyaan ciidanka ammaanka Kenya – ayna ka midka yihiin tababarka iyo tasiilaadka –aanay gaarin unugyada ama taliyayaasha lagu eedeeyay dadka la la' yahay, dilalka sharci darrada ah ama jirdilka. Waa in ay taageeraan, gaar ahaan dhaqaalo ku bixiyaan, tallaabooyinka wanaagsan ee lagu xaqiijinayo baaritaan wax ku ool ah oo ku aaddan tacaddiyada noocan ah ee ka dhaca guud ahaan dalka, ayna ka midka yihiin kuwa lagu xusay warbixintan, iyo in ay ku baaqaan la xisaabtanka kuwa dembiyadaasi geystay.
- In ay xaqiijiyaan in taageeradooda dhaqaale aanay gaarin unugyada iyo askarta tacaddiyada geysta ee xiriirka la leh Sirdoonka Milateriga, Waaxda Dembi Baarista, Booliska Argagixiso La Dagaallanka, Cutubka Sida Degdega ah Loo Hawlgeliyo, Cutubka Ilaaliya Xuduudaha Miyiga ee ka tirsan Ciidanka Maamulka, Hay'adda Qaran ee Sirdoonka iyo Waaxda Ilaalinta Duurjoogta.
- In ay taageeraan alkumida gudi madax bannaan, sida lagu soo jeediyay warbixintan, kaasoo bixinaya macluumaadka ku aaddan dadka la la' yahay iyo kuwa lagu dilay gobolka waqooyi bari ee Kenya iyo qeybaha kale ee dalka, iyo weliba in uu taageero hannanaka garsoor ee lagu qaadayo kuwa lagu eedeeyay in ay mas'uulka ka yihiin tacaddiyadaas.

- In ay taageeraan hirgalinta hannaan gaar ah oo lagu hubinayo askarta, kaasoo kaabaya kan gaabiska ah ee hadda lagu hubinayo booliska, si meesha looga saaro askarta booliska, milateriga, ilaalada duurjoogta, iyo kuwa sirdoonka ee lagu helo in ay mas'uul ka yihiin tacaddiyada ba'an ee xuquuqda aadanaha.
- Ku dhiirigaliya in dowladda Kenya ay uga jawaab-celiso weerarrada Al-Shabab qaab waafaqsan heerka caalamiga ee xuquuqda aadanaha u yaalla.